POLIISI
POLISEN I FINLAND
Police of Finland

CAAWIN AYAA LOO HELAA RABSHADAHA QOYSKA KA DHEX DHACA

Rabshadaha qoysaska dhexdiisa ka dhacaa, waa rabshadaha loo gaysato qof kasta oo reerka ka mid ah. Rabshaddu waxay noqon kartaa qaab dhaqan xun ama si qalad ah oo qofka loola dhaqmo, taas oo qofka ku khasbaysa isaga oo aan raali ka ahayn in uu bedelo, fikirkiisa, hadaladiisa iyo wax-qabadkiisa. Rabshad waxa tusaale ahaan noqon karta hanjabaad hadal ah, mid waji-ka hanjab ah, gacan ula tag, ciijin, riixid ama hor istaag. Rabshad waxa sidoo kale noqon karta faraxumayn (seksuaalinen), mid dhaqaale ah, mid dhijitaal ah (aaladaha internetka), mid daba dhigasho leh, mid ku xad gudubta qofka ama ilmaha karaamadiisa, mid dadka da'da ah ama kuwa naafadda ah loo gaysto oo tusaale ahaan daryeel la siin waayo iyo siyaabaha kale oo rabshad noqon kara ee qofka loola dhaqmi karo. Calaamadaha rabshadda lagu garto, waxa ka mida in qofku ka cabsado qofka kale falkiisa ama uu ka cabsado falcelintiisa.

Rabshadaha qoysaska dhexdiisa ka dhacaa, waxay u bilaabmaan si lama filaan ah. In marka hore dhibka rabshadda hoos loo dhigo, layska dhaga tiro ama aan waxaba laga soo qaadin. Rabshaddu waxay isu bedeli kartaa mid jir-dil wadata ama mid nolosha qofka khatar gelisa. Waxa dhici karta in dadka rabshaddu kala dhex marayso, u arkaan xaalad "iska caadi ah", laakiin rabshaddu marnaba maaha wax iska caadi ah, loomana baahna in uu qofku oggolaado. Laakiin yaan rabshad la moodin markay dadku wada murmayaan oo si aaminaad leh dareenkoodda u muujinayaan. Hase yeeshee rabshaddu markay timaado, waxa mas'uuliyadeedda qaadaya qofka rabshadda wada.

Dhaawacyo ama waxyeello badan ayey qoyska ku keenaan rabshadaha xagjirka ah ee qoyska dhexdiisa ka dhacaa. Carruurtu khaasatanba wax dadka waawayn aanay oggayn ama la socon ayey arkayaan, maqlayaan oo dareemayaan. Hadii xitaa ilmuhu isla markaas arkayn ama tilmaami karayn in guriga rabshadi ka socoto, laakiin dareenka, xaasaasiga iyo cabsida xoogmuquujinta guriga dhexdiisa ka jirtaa, saamayn wayn ayey ilmaha ku yeelanaysaa. Jiilkasta oo rabshad lagu soo koriyaa, jiilka kale ayey u sii gudbiyaan. Sidaa awgeed waa muhiim in rabshadda xoogmuquujinta ah la joojiyaa. Sidoo kale dadka da'da ah iyo dadka naafadda ahba, waxay mar walba xaq u leeyihiin inay nolol qiimo leh oo ammaan ah ku noolaadaan.

Qofka marka la rabsho ama ka cabsi qabo in la rabsho, kartidiisa ayaa hoos u dhacda. Waxa ku adkaata in uu caawin raadsado oo uu is diidsiiyo in rabshad lagu wado. Taasi waxay keentaa inuu caawin heli waayo qofka rabshaddu ku socotaa. Markaa in uu qofku caawin raadsadaa waa talaabadda ugu horaysa ee qofku kaga gudbi karo rabshadda isla markaa jirta. Keli ha ku noqon – rabshadaha xagjirka ah ee qoyska dhexdiisa ka dhacaa, cid walba way saamayn karaan. Rabshaddu ma taqaan da', lab iyo dhedig, qaab-galmeedka qofka, dhaqanka qofka ama dabaqadiisa dhaqaale. Rabshaddu in ay iskeed u joogsato waa xaaja, waxaa dhici karta in ay ka sii darto oo sii xumaato.

Rabshaddu maaha wax qoyska dhexdiisa caadi ka ah, waa danbi. Booliiska shaqadiisuna waa in uu dhibaatooyinka ansixiyo oo danbiyadana ka hortago. Booliisku markuu boroseeska danbi-baarista ku guda jiro, wuxuu isku dayaa in si eexasho la'aan ah uu u caawiyo dadka, si rabshaddu u joogsato. Najiitadda guud ee xilyahayaasha dowladda iyo ururadda samafalku rabaan, waa caawinta dadka dhibaatooyinkaa adag ee noloshu haysato.

Keli ha ku noqon!

Hoos waxa ku qoron adeegyadda qaranka ee sida shaqsinimadda leh, u caawiya dadka dhibaatadda rabshaddu noloshoodda saamayso. Waxa caawinta heli kara lammaane iyo qoyska oo dhan. Caawintu waa mid aaminaad leh oo bilaa lacag ah. Qofku waa la caawinayaa xitaa isaga oo aan magaciisa sheegayn. Qaybta hoose waxa ku qoran adeegyadda caawinta ee degaankaaga. **Haddii aad khattar ku jirto la hadal lambarka 112.** Isgaarsiinta, hagitaanka iyo macluumaadka danbiilaha ama dood furaha iyo macluumaadka soo sheegidda danbiga ee dhanka internetka, waxaad ka helaysaan, bogga internetka ee Booliiska, www.poliisi.fi.

- Nollalinja waxay caawisaa qoysaska iyo dumarka loo gaysto rabshadaha xagjirka ah, waa rabshadaha xagjirka ah ee qoysaska dhexdoodda ka dhaca. Dadka waxa loogu adeegaa lambarkan 080 005 005, kan oo furan 24.ka saacadoodba. Adeeguna wuxuu ku baxayaa luuqadaha Af-fiinnishka, Iswiidhishka iyo Ingiriisiga iyo luuqadaha kale ee la turjumo, sida Af-carabiga, dariga, farsiga, soomaaliga, sooraaniga iyo ruushka. Nollalinja waxay leedahay adeegga-Chatka, www.nollalinja.fi. Nollalinja waxay sidoo kale caawisaa qaraabadda dadka rabshadaha xagjirka ah loo gaystay.
- Tilifoonka MIELI ry (09 25250111) heegan ahaan ayuu luuqadda fiinishka ugu furan yahay 24.ka saacadood. Waxa aad sidoo kale adeegoodda ku helaysaa luuqadahan: Af-iswiidhish, Ingiriisi iyo carabi. Faahfaahin dheeraad ah: www.mieli.fi
- Guryaha ammaanku (Turvakoti) way ku caawinayaan, mar walbana waad la soo hadli kartaa, haddii tusaale ahaan qof kuu dhaw uu rabshad xagjir ah kugu wado ama aad ka cabsi qabto ama khatar ku jirto. Guryaha ammaanku waxay furan yihiin habeen iyo maalinba. Ururka hoy-ku-taageerka qoysaska iyo guryaha ammaanka, waxay caawin furan siiyaan dadka rabshadaha xagjirka loo gaysto ama ka cabsi qaba in loo gaysto iyo weliba dadka iyagu rabshada xagjirka ah wada ama ka cabsi qaba in ay rabshadahaas sameeyaan, sida lammaanaha iyo ilmaha u nuglaaday rabshadaha xagjirka ah amaba loo gaystay rabshadahaas. Faahfaahin dheeraad ah: www.nettiturvakoti.fi
- Xafiiska heeganka dhibanaha (RIKU) waa goob aad ka helayso dad ku caawiya oo aad dhibkaaga kala la sheekaysato. Waxa goobtan caawin talobixin ah laga siiyaa dhibanayaasha, ehelkoodda iyo markhaatiyadda danbiga dhacay. Dhibanuhu wuxuu sidoo kale codsan karaa in la siiyo qof isaga taageera, markuu boroseeska danbiyadda ku dhex jiro. Caawintu kuma eeka adeegga heeganka tilifoonka ee dhibanaha, goobtu waxay leedahay looyaro dadka ku caawiya adeegga (Chatka) iyo adeegyadda gaarka ah ee caawinta dhibanaha la soo cabiidsaday ama lagu shaqaystay. Faahfaahin dheerad ah: www.riku.fi
- Adeegga goobta caawinta dumarka (Naistenlinja), waxa loogu talo galay dumarka, hablaha iyo ehelkoodda, loo gaystay rabshadaha xagjirka ah. Rabshadaha ama gardarada ka dhaca dhanka aaladaha internetka ee loo yaqaano rabshadaha dhijitaalka, waxa kaa caawinaya ciwaankan *Turv@verkko-puhelin ja chat*, faahfaahin dheeraad ah: www.naistenlinja.fi
- Kooxaha ragga (miessakit) waxa lagu caawiyaa ragga loo gaystay ama iyagu gaystay rabshadaha xagjirka ah. Goobta waxa sidoo kale ragga lagaga caawiyaa dhibaatooyinka furniinka guurku keeno. Adeegayadda waxa sidoo kale lagu heli karaa tilifoon ama kulamadda dhanka internetka, www.miessakit.fi
- Goobta caawinta ragga (Miehen linja) waxa loogu talo galay in lagu caawiyo nimanka Finland u soo guuray ee ka cabsi qaba in loo gaysto rabshadaha xagjirka ah ama in ay iyagu ku dhaqaaqaan rabshadaha noocaas ah, www.lyomatonlinja.fi/fi/toiminta/palvelut/miehen-linja
- Dumarka ku dhaqaaqa rabshadaha xagjirka ah ama ka cabsi qaba in ay ku dhaqaaqaan, waxa caawiya goobta Maria Akatemia, www.mariaakatemia.fi
- Dabagalka ama daba dhigashada loo gaysto lammaanaha, markuu furniin guur dhaco, waxa caawinteedda leh goobta Tukikeskus Varjo, www.varjosta.fi
- Adeegga caawinta dhanka dadka da'da ah, waxa bixiya Suvanto ry,www.suvantory.fi, puh. 050 577 0218
- Ururka dumarka ee (Monika-naiset), waxay dumarka soo guuraaga ah caawin ku siiyaan goobaha (Kriisikeskus Monika iyo Turvakoti Mona). Waana adeegyo taageer oo ku baxa luuqado kala duwan, www.monikanaiset.fi
- Shaqo-qabadka SOPU ee (Loisto Setlementti), waxay caawiyaan dadka loo gaystay rabshadaha xagjirka ee dhanka sharafta ama karaamadda qofka ama kuwa dhibaatooyinka noocas ah ka cabsi qaba, www.soputila.fi
- Degaanka waxa ku waajiba in ay diyaariyaan macluumaadka adeegyadda bulshada ee dhanka dhibaatooyinka nolosha dadka, sida baahiyadda tageerka ah ee la siiyo dadka loo gaysto rabshadaha qoyska ee xagjirka ah. Dhibaatooyinka maandooriyaha iyo joojinteedda waxaad kala xiriiri kartaan (A-klink). Ka ku yaala goobtaadda degaanka. (A-Klink) wuxuu sidoo kale caawiyaa qaraabadda dadka dhibban. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan maandooriyaha: www.paihdelinkki.fi. Ddibaatooyinka caafimaad darradda dhanka maskaxda, kala xiriir xaruntaadda caafimaadka. Faahfaahin dheeraad ah: https://www.mielenterveystalo.fi/

Fariin qoran oo deg deg ah, waxaad ka diri kartaa, taleefan lambar oo diwaan gashan. Faahfaahin dheeraad ah https://112.fi/hatatekstiviesti

Dhibaatooyinka khatarta keena waxa lagaga hor tagaa in la sii samysto qorshe-ammaan: https://nettiturvakoti.fi/nain-haet-apua/turvasuunnitelmat/

Booliisku wuxuu ammar ku bixin karaa, u soo dhawaansho la'aan (lähestymiskielto) ku meel gaadh ah: https://poliisi.fi/en/restraining-order

Dhanka caawinta dhibanaha rabshadaha xagjirka khatarta ah, caawinteedda waxa laga helaa toban degmo-degaan. Waxa degaanadaasi leeyihiin nidaam loo yaqaan MARAK, kaasoo isku dubarida oo isu keena xilhayeyaasha iyo ururadda degaanka ee dhibanaha caawiya oo dhan. Faahfaahin dheeraad ah: www.thl.fi/marak

Mar marka qaar waxa suurto gal ah in rabshadaha qoysaska dhexdoodda ka dhaca, heshiisiin lagu dhamayn karo. Faahfaahin dheerada oo heshiisiinta ku saabsan: https://poliisi.fi/en/mediation